ROBBINSDALE Area Schools

Heshiiska Adeegsiga ee Ardayga/Qoyska: Qalabka Dijitalka ah

Dugsiyada Aagga Robbinsdale waxay siiyaan arday kasta oo ku jira fasallada K-12 qalab dijital ah. Aaladdan waxaa loo adeegsan doonaa inuu ku xiro dugsiyada ardayda iyo qoysaska, u oggolaado ardayda inay naftooda u muujiyaan siyaabo cusub oo xiiso leh, iyo in loo gaaryeelo khibradda waxbarasho ee arday kasta.

Aaladaha Dijital ah
Qalabka dhijitaalka ah badiyaa waa Chromebook-ka ama iPad-ka. Xiriir internet ayaa loo baahan yahay si loo kaydiyo loona wadaago inta badan shaqada ardayga. Haddii ardaygaagu aanu lahayn xiriir internet, fadlan la xiriir dugsigaaga si aad u hesho macluumaad ku saabsan ikhtiyaarrada internetka jaban ee qoyskaaga. Goobo kala duwan oo bulshada ayaa sidoo kale bixiya internet bilaash ah, oo ay ku jiraan maktabadaha dadweynaha. Xarumaha Warbaahintu waxay leeyihiin tiro xadidan oo hotspot-yo ah (aaladaha wifi -ga intarnet-ka ee gacanta).

Qorshaha ilaalinta aaladda
Dadaal loogu jiro in laga ilaaliyo qoysaska kharashyada aan la garanayn ee laga yaabo inay keento xatooyo ama waxyeello shil inta aaladdu ay ku jirto daryeelka ilmahaaga, degmadu waxay bixisaa qorshe ilaalinta aaladda. Qorshaha ilaalinta aaladda wuxuu ku kacayaa $ 25 sannad dugsiyeedkii arday kasta ($ 5.00 sannadkiiba arday kasta qoysaska u qalma dheefaha waxbarashada). Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan Qorshaha Ilaalinta Aaladda, fadlan la xiriir maamulka dugsigaaga.

- Qorshaha ilaalintu wuxuu daboolayaa waxyeelada shilka ugu horeeya. **Qiime-goyntu** waxay ku dabaqmaysaa waxyeelooyinka xiga.
- Qorshaha ilaalinta aaladdu ma daboolayo jaajarka iyo galka.
- Haddii aaladdaada la xado, bixi caddayn in warbixinta booliska la xareeyay.
- Waxyeellada ka dhalatay si xun u adeegsigu ma daboolayo qorshaha ilaalinta aaladda.

Aaladaha dhijitaalka ah iyo agabka ayaa ah hantida Dugsiyada Aagga Robbinsdale waana in lagu soo celiyaa Dugsiyada Aagga Robbinsdale dhammaadka sannad-dugsiyeed kasta ama marka laga baxo dugsiga. Ganaaxyada waxaa lagu qiimeyn doonaa burburka dayacaad ama luminta aaladda, jaajarka, ama galka. Aaladaha iyo agabka aan lagu soo celin taariikhda ka bixitaanka ardayga ayaa loogu wargelin doonaa in la xaday waaxda booliska ee deegaanka.

Adeegsiga Masuuliyadda leh iyo Daryeelka Aaladda
Fadlan si taxaddar leh ugu dhaqan aaladda oo hubi in ardaygaagu:

- Keeno aaladda dugsiga maalin kasta, iyadoo si buuxda u jaajgaraysan.
- Ku kaydiyo kuna jaajgareeyo aaladda meel aamin ah oo dhowrsan.
- U adeegsado galka la siiyay uuna sameeyaa daryeelka marka la qaadayo aaladda.
- U soo wargeliyaa dhakhso wixii dhibaato ama waxyeello ah macallinka ama shaqaalaha xarunta warbaahinta ee maktabadda.

Saxeexidda kaarka aqoonsiga micnaheedu waa inaad kala hadashay ardaygaaga adeegsiga mas'uuliyadda leh iyo daryeelka habboon ee aaladda, xoojinta u adeegsiga aaladda ujeeddooyin waxbarasho.

Ilmahaagu wuxuu mas'uul ka noqon doonaa u hoggaansanaanta Qaanuunka Adeegsiga Nabdoon ee La Aqbali Karo ee (524) iyo Qaanuunka ka-hortagga xoogsheegashada(514) *sida lagu qeexay Buug -gacmeedka Ardayga: Xuquuqda iyo Waajibaadka.*

Ururka Warbaahinta Caadiga ah 'Common Sense Media' waxay bixisaa macluumaadka la xiriira muwaadinimada dhijitaalka ah iyo tilmaamaha si looga doodo adeegsiga tiknoolajiyada ee qoyska.

ROBBINSDALE Area Schools

Qorshaha Ilaalinta Aaladda iyo Kharashka Waxyeelada/Bedelidda ee

Qorshaha Ilaalinta Aaladda

Dadaal loogu jiro in laga ilaaliyo qoysaska kharashyada aan la garanayn ee laga yaabo inay keento xatooyo ama waxyeello shil inta aaladdu ay ku jirto daryeelka ilmahaaga, degmadu waxay bixisaa qorshe ilaalinta aaladda. Qorshaha ilaalinta aaladda wuxuu ku kacayaa $ 25 sannad dugsiyeedkii arday kasta ($ 5.00 sannadkiiba arday kasta qoysaska u qalma dheefaha waxbarashada). Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan Qorshaha Ilaalinta Aaladda, fadlan la xiriir maamulka dugsigaaga.

- Qorshaha ilaalintu wuxuu daboolayaa waxyeelada shilka ugu horeeya. **Qiime-goyntu** waxay ku dabaqmaysaa waxyeelooyinka xiga.
- Qorshaha ilaalinta aaladdu ma daboolayo jaajarka iyo galka.
    - *Waxaa jira ganaax dhan $ 20 oo loogu talagalay jaajarka luma iyo $ 25 oo ganaax ah oo galka luma ah.*
- Haddii aaladdaada la xado, bixi caddayn in warbixinta booliska la xareeyay.
- Waxyeellada ka dhalatay si xun u adeegsigu ma daboolayo qorshaha ilaalinta aaladda.
- Qorshaha Ilaalinta Aaladdu ma daboolayo hotspot-yada.
    - *Waxaa jira ganaax dhan $ 40 oo loogu talagalay hotspot-ka luma iyo $ 5 oo ganaax ah jaajarka hotspot-ka luma.*

Faahfaahinta Qorshaha Ilaalinta Aaladda:

Qorshaha Ilaalinta Aaladda (QIA)	
Qorshaha Ilaalinta Aaladda	$25

**Ama $5 arday kasta qoysaska u qalma dheefaha waxbarashada.*

Khasiraadda Waxyeelada	Leh DPP (QIA)	DPP (QIA) La'aan
Dhacdada koowaad (sannad-dugsiyeed kasta)	Kharash la'aan	$60
Laba dhacdo ama ka badan (mar kasta sannad-dugsiyeed kasta)*	$25 (each)	$60 (each)

**Waxa kale oo laga yaabaa inay keento abuuritaanka tixraac edbin ah oo loogu talagalay "si xun u adeegsiga tiknoolajiyadda".*

***Waxyeellada ula kac ah laguma daboolayo qorshaha ilaalinta aaladda. Kharashka dayactirka buuxa ama beddelaadda ayaa laga yaabaa in loogu qiimeeyo ardayga $ 299 iPad-ka ama $ 180 Chromebook-gga.*

Khasiraadda Xatooyada ama Luminta	Leh DPP (QIA)	DPP (QIA) La'aan
Xatooyada leh warbixinta booliska (dhacdo kasta sanad-dugsiyeed kasta)	$50 (mid kast)	$100 (mid kasta)
Khasaaraha dayacaad awgeed (dhacdo kasta sannad-dugsiyeed kasta)	$100 (mid kasta)	$150 (mid kasta)